

## Faafinta tallaalka Alberta ayaa sii kordheysa

Abril 12, 2021

Iyada oo xarumo caafimaad oo deg deg ah laga furayo Kaalgari (Calgary) iyo Edmonton, Alberta waxay fidineysaa qeybinta si ay ugu bixiso qiyaaso xawaare diwaan gal ah.

Iyada oo in ka badan 1,300 oo farmashiyeyaal ah iyo 103 goobood oo tallaal ah ay imminka maamulayaan tallaalka, iyo in ka badan oo ku sii kordhaya toddobaadyada soo socda, gobolka wuxuu hadda ku jiraa xawaare uu ku qaybinayo in ka badan 300,000 oo qiyaasood usbuucii.

In ka badan 684,000 oo reer Alberta ah ayaa hadda helay ugu yaraan hal qiyaas oo tallaal ah, oo gacan ka geysaneysa ka hortagga natiijooyinka daran iyo yareynta faafidda KOOFID-19.

Dhammaan dadka qaangaarka ah ee ku nool Alberta waxaa la siin doonaa qaddarka ugu horreeya ee tallaalka dhammaadka Juun, haddii tallaallada u yimaadaan sidii loogu talagalay.

Tartankii u dhhexeyay tallaalada iyo noocyada kala duwan, waan sii xoogeysaneynaa. Wuxaan sii wadi doonaa xawaareynta iyo jadwalka shaqada. Waxaa naga go'an inaan la kulanno ama kasoo baxno ballanqaadkeenna oo aan siinno qof kasta oo qaangaar ah tallaalka ugu horreeya illaa Juun 30."

*Jason Kenney, Gudoomiyaha*

Saraakiishayaga caafimaadka waxay si adag uga shaqeynayaan sidii ay shixnado cusub oo tallaal ah ugu heli lahaayeen reer Alberta isla marka ay yimaadaanba. Wuxaan si xoogan ugu boorinayaa dadka Alberta inay is talaalaan isla marka aad u qalmaan. Markay tahay goortaada, fadlan iska qor tallaalkaaga, tus ballantaada oo la soco qiyaastaada labaad.

*Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka*

Toddobaadkii la soo dhaafey, Alberta waxay qaaddey talaabooyin badan si loo kordhiyo qeybinta tallaalka:

- Si buuxda ayaan ugu furnay Wejiga 2B in ka badan 650,000 oo reer Alberta ah u qalma oo xaalado caafimaad salka ku haya.
- Waxaa loo furay Wajiga 2C in kabaden 240,000 oo ah shaqaalaha daryeelka caafimaadka.
- Balamo furan oo loogu talagalay tallaalka AstraZeneca (AstraZeneca) ee dadka Alberta ee da'doodu tahay 55 ilaa 64.
- Waxaa xarumo caafimaad oo degdeg ah laga furay Garan Barari (Grande Prairie), Foort Makmori (Fort McMurray), Red Deer, Lasbarij (Lethbridge) iyo Medesin Hat (Medicine Hat), marka lagu daro rugaha caafimaadka ee Kaalgari (Calgary) iyo Edmonton oo la furayo Abril 12.

Bisha Abril 13, xulo farmasiyada kaqeybgalaya, oo markii hore laga bilaabay Edmonton iyo Kaalgari (Calgary), waxay bilaabi doonaan inay u oggolaadaan ballamaha dadka ee tallaalka AstraZeneca ee loogu talagalay dadka reer Alberta ee u qalma, halkii aad ka heli lahayd ballan keliya. Farmashiyayaal badan ayaa ayaa ballan kaliya marka fadlan ka eeg bogga Alberta Buluu Koros (Alberta Blue Cross) ee goobaha ballan la'aanta ;agu tagi karo ama la xiriir goobtaada gaarka ah si aad wax badan uga ogaato habka ballansashada.

Caafimaadka Alberta (Alberta Health) iyo Ururka Caafimaadka ee Alberta waxay si wada jir ah uga shaqeynayaan in lagu daro dhakhaatiirta rugaha caafimaadka iney ka jawaabaan talaalka KOOFID-19. Xogta ku saabsan rugaha caafimaad ee ugu horreeya iyo ballaarinta ayaa dhowaan lagu dhawaaqi doonaa.

Kooxo dheeraad ah oo ku taxan Wajiga 2C ayaa xaq u yeelan doona toddobaadyada soo socda. Xog dheeri ah ayaa la wadaagi doonaa maadaama kox kastaa ay xaq u leedahay inay qabsato ballamo.

In kabadan 1.7 milyan oo reer Alberta ah ayaa hadda xaq u leh tallaalka KOOFID-19. Boos celinta waxaa lagu sameyn karaa farmasiyada kaqeyb qaadanaya ama Adeegyada Caafimaadka Alberta (Alberta Health Services (AHS) khadka tooska ah ama wac 811.

Dawladda Alberta waxay ka jawaabaysaa faafida KOOFID-19 iyada oo ilaalinaya nolosha iyo habnololeedka iyada oo tilaaboyin sax ah u mareysa, joogtaynta ganacsiyada yaryar iyo ilaalinta nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta.

## Xogta la xiriirta

- Tallaalka COVID-19 ee Alberta ([COVID-19 vaccine in Alberta](#))
- Ballan ka qabso farmashiyaha ([Book an appointment at a pharmacy](#))

## Warbaahinta Kala duwan

- Daawo shirka warfaafinta ([Watch the news conference](#))
- Dhageyso shirka warfaafinta ([Listen to the news conference](#))
- Daawo sawirada dhacdada ([View the event photos](#))
- 

## Weydiimaha warbaahinta

**Jerrica Goodwin**  
587-988-3278  
Xoghayaha Sakaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

**Tom McMillan**  
780-422-4905  
Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

*Si aad u hesho ilaha la tarjumay ee dawladda, fadlan booqo: <https://www.alberta.ca/covid-19-translated-resources.aspx>.*